



Tijaabada socodka dambe ee 7 xirmo

Baaritaanka sanka kaliya ah

# Sidii aad iskugu baari lahayd talaabo-talaabada Getein Biotech COVID-19


## Digniin

Haku qasin hana isku darin waxyaabaha kujira agabyada kale ee baaritaanka.


## Si taxaddar leh u akhri hagahaan kahor inta aadan bilaabin.

Baaritaankaanu waxaa dhici karta inuu ka duwanyahay baaritaanadii kale ee aad horey u isticmaashay.

### Baaritaanka




1. Labada duleel ee sankaba mari



2. Diyaarso muunadda



3. Sug



4. Natiiyooyinka

Tilmaamahaan waa hage talaabo-talaabo ah oo ku saabsan sidii aad naftaada ama qof kale aad ugu samayn lahayd baaritaanka Getein Biotech lateral flow COVID-19. Tilmaamaha dheeraadka ah ee ku saabsan xiliga aad marayso baaritaankaaga ama aad soo gudbinayso natiijadaada ee uu qofka ku baarayaa soo saarayo.

Si aad u hesho luuqad aan tan ahayn iyo qaababka kale ee tilmaamahaan.

Bookho: [gov.uk/covid19-self-test-help](https://www.gov.uk/covid19-self-test-help)

Tilmaamahaanu waxay la xiriiraan Getein Biotech One Step Test for SARS-CoV-2 Antigen (Getein Biotech Baaritaanka Halka Talaabo ah ee SARS-CoV-2 Antigen) (Quruurax Dahabi ah), oo is baaris ah, koodhka badeecada: CG206157.

# Waxa aad u baahan tahay inaad samayso

## Hagahaaga talaabo-talaabada ah

Akhri tilmaamaha una raac talaabooyinka si sax ah.

## Maxay tahay sababta aad adigu isku baarayso

Agabka is-baarista COVID-19 waa qalab baaris oo sanko la marinayo si loo arko inaad qabto fayraska aadna gudbinayso, xaataa haddii aadan astaamo lahayn.

## Buuggaan dhexdiisa

Maxaad u baahan tahay inaad sameyso	2
Hagaha iyo taxaddarka	3
Waxyaabaha ku saabsan baaritaankaan	4
Diyaarso meesha aad baaritaankaaga ku samaynayso	5
Hubi waxyaabaha kujira agabkaaga	6
Diyaarso baaritaankaaga	7
Baarista qofi kale	9
Qaad muunaddaada baaritaanka	10
Diyaari muunadda baaritaanka	11
Akhri natiijooyinkaaga	13

# Hagaha iyo taxadarada

- Ha isticmaalin wax kujira agabka baarista haddii baakatku waxyeeloobay, daboolu ka jabay, ama haddii qaybtu u muuqato inay jabtay.
- Ha ku qasin waxyaabo kujira agab baaritaan oo kale. Kaliya isticmaal waxyaabaha kujira agabkaan lagu siiyay, maadaama dareeraha kujira tuyuub baariseed uusan ku shaqaynayn mid kujira tuyuub baariseed kale.
- Dhammaanba qaybaha qalabka tijaabadabagabka baarista waxaa loogu tala galay in hal mar la isticmaalo marka laga reebo midka la galiyo tuyuubka soo qaadista. Dib ha u isticmaalin qaybo kamid ah oo aan ka ahayn midka uyuubka la galiyo.
- Agabkaan waxaa loogu tala galay in dadka kaliyuhu isticmaalo.
- Ku xafid meel aysan caruurta gaari karin. Agabka baaritaanku wuxuu ka kooba yahay qaybo yaryat oo keeni kara khatar ku margasho ah.
- Haddii sanku kuu duran yahay, iska saar kahor inta aadan baaritaanka samayn.
- Ha adeegsan awood ama cadaadis xad-dhaaf ah hana qaloocin qalabka baarista marka aad iska qaadayso muunadaha baaritaanka, maadaama arintaan jabin karto qalabka baarista.
- Haddii aad la kulanto dhiig sanku ah inta lagu jiro suufka, jooji baaritaanka. Haddii qalabka baaritaanka dhiig la socdo, looma isticmaali karo baaritaanka. Sug 24 saacadood kahor inta aadan baaritaan cusub samayn.
- Ha u ogolaan in gasacadda qalabka baaritaanku kujiro ay taabtaan waxyaabaha nadaafadda loo adeegsado ee guriga yaala, maadaama arintaan ay ka dhalanayso natiijo khalad ah.
- Nadiifi waxyaabaha kasoo daata tuyuubka aagga ah adiga oo adeegsanaya tiish iyo waxyaabaha guriga jeermiska looga dilo.
- Baaritaanku kuma haboona dadka qaba qalliimada wajiga ama madaxa ah oo ay mareen 6dii bilood ee ugu danbaysay, ama qof u nugul inuu sanku ka dhiigo.
- Haddii aad dhibaato ka qabto gacmaha ama indhaha, waxaad u baahanaysaa in qof uu kaa caawiyo hanaanka baaritaanka iyo qaadista muunadda.

# Waxyaabaha ku saabsan baaritaankaan

## Baaritaankaanu wuxuu ku haboon yahay:



**Dadka waaweyn ee 18 jirada iyo wixii kasii weyn ah**  
Is-baarista, oo kaalmo leh haddii loo baahdo.



**Qaangaarka 12 ilaa 17 jirada ah**  
Is-baaris ayada oo qof weyn korjoogtaynayo (uuna caawinayo haddii loo baahdo).



**Caruurta**  
Caruurta da'doodu tahay 11 iyo kasii yar waa in qof weyni baaraa.

## Haynta iyo kaydinta

- Ku kaydi agabka baaritaanka heerkulka caadiga ah ama meel qalalan oo qabow (4°C ilaa 30°C).
- Ha dhigin meel falaaraha qoraxdu kasoo gaarayaan hana ku kaydin qaboojiye.
- Agabka waa in lagu isticmaalaa heerkulka caadiga ah (15°C ilaa 30°C). Haddii agabka lagu kaydiyo meel heerkulkeedu ka hooseeyo 15°C, dhig meel heerkulkeedu caadi yahay muddo ilaa 30 daqiiqo ah kahor inta aadan isticmaalin.

## Haddii aad yeelato astaamo cusub oo COVID-19

Bookho [nhs.uk/coronavirus](https://www.nhs.uk/coronavirus) for the most up-to-date advice.

### Iska ilaali



**Haddii aad ka welwelsan tahay astaamahaaga,** ama astaamahaagu kasii darayaan. la xiriir dhakhtarka guud, bookho **NHS 111** bookhashada onleenka ah **111.nhs.uk** ama wac **111** si aad qof si toos ah ula hadasho.

Waxyaabaha ku saabsan xaaladaha caafimaad ee degdega ah, garaac **999** islamarkiiba.

# Diyaarso meeshii aad baaritaanka ku samayn lahayd

**Waxaad u baahan doontaa:** Wakhti cabire sida saacad, goorsheegto a,a qalabka moobeelka, tiishash, oogo nadiifiye, gacmo nadiifiye ama biyo kuluul iyo saabuun.



- 1 Si taxaddar leh u akhri tilmaamahaan, hadii aad kaalmo dheeraad ah u baahato, bookho: [gov.uk/covid19-self-test-help](https://www.gov.uk/covid19-self-test-help)



- 2 Islamarkiiba kahor inta aadan bilaabin baaritaanka, bane, nadiifi oo qalaji oogo siman oo aad agabka baaritaanka saarato.



- 3 Si adag gacmaha u dhaqo muddo ilaa 20 ilbiriqsi ah, adiga oo isticmaalaya saabuun iyo biyo kuluul ama isticmaal gacmo nadiifiye.

Haddii aad samaynayso hal baaritaan wax ka badan, nadiifi oogada oo haddana gacmaha dhaqo baaritaanada dhexdooda.

# Eegtaa waxyaabaha agabka kujira

## Iska ilaali

Ha kuqasin waxyaabaha kujira baakatka agabyada kale ee baaritaanka.

## Bokiskaaga baaritaanka waa inaad:

1x

Bokis leh duleelka la galinayo tuyuubka soo qaadista




7x

Boorsooyinka agabka



7x

Qalabka baarista oo nadiif ah




7x

SARS-CoV-2 kaarka baarista anigen-ka oo kujira boorso gasacad ah oo seejalan



7x

Tuyuubka soo qaadista oo leh milanka muunadda lasoo qaadayo iyo caarad



## Iska ilaali

Kahor inta aadan bilaabin, eeg taariikhda dhicitaanka ee ku qoran bokiska agabka baarista dushiisa iyo boorsada seejalan (EXP). Ha isticmaalin agabka baaritaanka haddii uu dhacay wakhtigiisu.

# Diyaarso baaritaankaaga

## Muhiim

Ha isticmaalin qalabka baaritaanka kaddib markuu dhamaado wakhtigiisa isticmaalku.



- 4 Kasoo saar gasacadda boorsada seejalan waxaadna saartaa oogada siman ee nadiifka ah.

Marka aad furto, bilow baaritaanka 60 daqiiqo gudahood.



- 5 Ka fogee tuyuubka qaadista oogada, tartiib ka fiiq daboolka tayuubka soo qaadista si aad iskaga ilaaliso in daadashada dareeraha.

### Iska ilaali

Haka isku dayin inaad ilkaha kaga fiiqdo daboolka.

Ka ilaali jirkaaga in milanku kugu daato. Haddii milanku jirka kaaga daato ama indhaha, si wanaagsan biyo ugu dhaq waxaadna raadsataa talo caafimaad haddii cuncunku sii socdo.




- 6 Gali tayuubka qaadista ee milanku kujiro godka la galiyo tuyuubka ee bokiska.



- 7 Si wanaagsan ugu fiifi sankaa** into atiish si diifku uusan u khaibin baaritaanka. Ku tuur tiishka weelka qashinka. Haddii aad baarayso canug/qof aad gacanta ku hayso, ka caawi sidii uu sankiisa u fiifin lahaa, haddii loo baahdo.



- 8 Gacmaha dhaqo** si adag muddo ilaa 20 ilbiriqsi ah adiga oo isticmaalaya biyo kuluul iyo saabuun ama gaca nadiifiye kahor inta aadan bilaabin shaqada kahor inta aadan gacmaha ku qaban agabka baaritaanka si aad uga fogaato wasakhayntiisa. Haddii aad caawinayso canug/qof aad gacanta ku hayso, **labadiinuba waa inaad gacmaha dhaqataan** si aad ah mudoo ilaa 20 ilbiriqsi ama aad isticmaashaan gacma nadiifiye.



- 9 Kala soo bax qalabka baarista ee nadiifka ah** dahaarka seejalan. Marka aad diyaar u noqoto bilaabista baaritaanka, ka fiiq baakatka qalabka qaybta danbe ee usha ah.



Tartiib uga soo saar qalabka baarista. Ka taxaddar inaad faraha u taaban caaradda xarigga ah.

### Iska ilaali

Ha u ogolaan caaradda qalabka baarista inay taabato meel kahor inta aadan qaadin muunadda, haddii kale waxaad u baahan doontaa inaad mid cusub soo bilowdo.



# Baarista qof kale

Caruurta da'doodu ka yartahay 12 sanno waxaa baaraya qof weyn. Raac tilmaamaha sida loo diyaariyo loona baaro canug ama qof u baahan in la caawiyo:

[gov.uk/covid19-self-test-help](https://gov.uk/covid19-self-test-help)

Tus canugga agabka baaritaanka waxaadna u sharaxdaa waxa aad rabto inaad samayso. Hadday suuragal tahay, ku fariisa qof dhabtiisa ama qof gacmaha ha qabto.

U sheeg canugga inuu sanku ku fiifiyo tiish. Ku rid tiishka weelka qashinka kaddibn labadiinuba si adag gacmaha u dhaqda muddo ilaa 20 ibiriqsi ah, adinka oo isticmaalaya saabuun iyo biyo kuluul ama gacma nadiifiye.

Haddii aadan ku kalsoonayn samaynta baaritaana, ama canuggu xanuun ka codsanayo. Hasii wadin baaritaanka.



## 10 Duleelka koowaad ee sanku


Tartiib caaradda xarigga ah u gali duleelka koowaad ee sanku canugga. Ha galin qalabka baaritaanka sankiisa wax ka badan 1.5 sintimitir.



## 11

Tartiib ugu tirtir qalabka baarista sanku dhexdiisa 4 jeer qaab wareeg ah. Xaqiiji in caaradda xarigga ah iyo sanku gudahiisu si wanaagsan isu taabtaan.

Ku dhaq labada dulalka sanku



## 12

## Duleelka labaad ee sanku

Gali caaradda xarigga ah ee isla qalabkaas duleelka labaad ee sanku canugga. Ku celi dhaqdhaqaaqinta wareegga ah 4 jeer ayada oo caaradda xarigga ah iyo sanku gudahiisu si wanaagsan isu taabanayaan.

# Qaado muunaddaada baaritaanka

## Talo


Si uu si fiican ugu shaqeeyo, gali qalabka baarista tuyuubka soo qaadista iyo milanka sida ugu dhakhsaha badan kaddib marka aad sanko kusoo baarto.



### 13 Duleelka koowaad ee sanko

Gali caaradda xarigga ah gudaha duleelka koowaad ee sanko qiyaastii 1.5 sentimitir. Uma baahnid inaad gudaha kusii fogayso awoodna kaagama baahna.

Tartiib qalabka baaritaanka ugu tirtir gudaha duleelka sanko 4 jeer qaab wareeg ah. Xaqiiji in caaradda xarigga ah iyo sanko gudihiisu si wanaagsan isu taabtaan.



### 14 Duleelka labaad ee sanko

Gali isla caaradda xarigga ah duleelka labaad ee sanko. Ku celi dhaqdhaqaaqinta wareegga ah 4 jeer ayada oo caaradda xarigga ah iyo sanko gudihiisu si wanaagsan isu taabanayaan.


## Iska ilaali

Haddii adiga, ama qof aad baarayso, uu sanko dhiig ka keeno xiliga baarista, hasii wadin, maadaama muunadda aan la baari karin. Haddii dhiiggu sii socdo, la tasho dhakhtar.

# Diyaari muunadda baarista



- 15** Gali caaradda xarigga ah ee qalabka baarista dareeraha kujira tuyuubka qaadista kuna dhax wareeji qalabka baaritaanka ugu yaraan **10 jeer**.




- 16** Si aad ah ugu riix caaradda gudaha tuyuubka **3 jeer**.



- 17** Kasoo saar tuyuubka qaadista.

Si adag ugu riix daboolka tuyuubka qaadista si aad uga ilaaliso in waax ka daataan.



- 18** Gali qalabka baarista boorsada caagga ah ee jiinyeerka leh.


## Talo

Boorsada gaarka ah ee jiinyeerka leh waxaa loo isticmaali karaa sida boorsada qashinka oo kale.

## Talo

Xaqiiji inaad qasacadda baaritaanka dhigto oogo siman oo iskumid ah. Ha dhaqaajin qasacadda xiliga aad baaritaanka waddo.

Si tartiib ah oo wanaagsan muunadda ugu dar dhibcaha. Ha buux-dhaafin.




**Kaliya**

**3x**

- 19** Tartiiib u tuuji tuyuubka qaadista si aad **3 dhibcood** oo dareere ah ugu riddo weelka muunadda into the sample well (ku calaamadaysan **S**) gasacadda korkeeda.

Xaqiiji inaad dareere ku riddo oo aadan hawo u shubin.



- 20** Diyaarso wakhti waxaadna sugtaa **10 daqiiqo** kahor inta aadan natiijadaada akhrin.




## Iska ilaali

Ha u ogolaan in baaritaanku socdo in ka badan **20 daqiiqo** maadaama arintaani natiijada ka dhigayso mid aan waxba kajirin.

# Akhriso natiijadaada

## Haddii cudurka lagaa helo



### Laba xariiq ayaa kuu soo baxaya.

Hal xariiq oo midab leh ayaa laga rabaa inuu maro xakamaha aagga xariiqa (**C**), iyo xariiq kale oo midab leh waa inuu maraa aagga xariiq baaritaanka (**T**).

Laba xariiq, mid u dhow **C** iyo mid u dhow **T**, xaataa xariiqyo baaba'ah, waxay muujinayaan inaad cudurka qabto.

Haddii aad cudurka iska hesho, waxaad noqon kartaa mid aad u faafinaya cudurka.

### waxa aad intaas kaddib samaynayso:

Raac waanada joogista guriga iyo ka fogaanshaha la macaamilka dadka kale.

Bookho: [nhs.uk/stay-at-home](https://www.nhs.uk/stay-at-home)

Haddii aad awooddo, u sheeg dadka aad xiriirka dhow la yeelatay in lagaa helay cudurka.

## Haddii lagaa waayo cudurka




Hal xariiq oo midab leh ayaa kasoo muuqdo aagga xariiq xakamaha (**C**). Maya xariiq ayaa kasoo muuqday aagga xariiq baaritaanka (**T**). Haddii lagaa waayo cudurka, waxay ka dhigantahay inaad faafinayn cudur xiligaas baaritaanka la sameeyay.

Natiijada ah in cudurka lagaa waayay ma damaanad qaadayso inaad qabin COVID-19. Adiga iyo qoyskaagu waa inaad raacdaan waanada sida la isjaga ilaaliyo qaadista iyo faafinta COVID-19.

Bookho: [nhs.uk/how-to-avoid-covid](https://www.nhs.uk/how-to-avoid-covid)

## Natiijo xumaatay



Xariiqa xakamaha (C) ma soo muuqanayo, ama kaliya hal xariiq oo gaduudan (T) ayaa soo baxaya, micnaheedu waa in baaritaanku xumaaday.

**Haddii hesho natiijo xumaatay**, taas micnaheedu waa inaysan macquul ahayn in la yiraahdo waxaad qabta fayraska xiligaas baaritaanka la samaynayo. Si aad u eegto inaad coronavirus qabto iyo in kale, kusoo celi baaritaanka adiga oo kasoo bilaabaya talaabada koowaad isticmaalayana agab cusub. Haka sii wadin talabada koowaad ee baaritaanka.



### **Si ammaan ah u astur agabkaaga baaritaanka**

Marka baaritaankaagu dhammaystirmo. ku tuur dhammaanba waxyaabaha kujira agabyada baaritaanka ee aad isticmaashay qashinka guriga. Si adag gacmaha u dhaqo marka aad tuurto kaddib.

### **Talo**

#### **Soo celi jawaabta baaritaankaaga ama soo sheeg waxyeelo**

Haddii qayb kamid ah agabkaaga baaritaanku uu waxyeeloobay ama maqanyahay, ha isticmaalin agabkaas. Waxaad wali isticmaali kartaa agabka kale ee baaritaanka ee boorsada kujira.

Haddii qalabku ku waxyeeleeyo ama aad hayso aragti ku saabsan agabkaaga baarista, inaad soo sheegto waxay wax u taraysaa dadka kale.

Bookho: [gov.uk/covid-19-test-feedback](https://gov.uk/covid-19-test-feedback).

## ISTICMAALKA LOOGU TALA GALAY

One Step Test for SARS-CoV-2 Antigen (Quruuruxa Dahabiga ah) waxaa loogu tala galay antigen-nada SARS-CoV-2 ee kujira muunadaha baaritaanka sanka. Baaritaanka waxaa loogu tala galay shakhsiyadka looga shakiyay COVID-19 todobada maalin ee ugu horeysa bilaabashada astaamaha cudurka, sida madax xanuunka, qandhada, qufaca, hunguri xanuunka, waayitaanka dareenka urka ama dhadhanka, neefta oo soo gaabata iyo murqa xanuun. Baaritaanka waxaa la siin karaa shakhsiyadka aan astaamaha lahayn. Natiijoyinka waxaa loogu tala galay in lagu ogaado SARS-CoV-2 Antigen. Natiijada muujinaysa in qofku cudurka qaba waxay muujinayaan jiritaanka antigen-nada SARS-CoV-2. laakiin macluumaadka hore ee shahsiga iyo baaritaanka kale ayaa muhiim in ugu go'aaminta xaaladda caabuqa. Natiijoyinka muujinaya in qofku uusan cudurka qabin meesha kama saarayaan jiritaanka caabuqa SARS-CoV-2. Natiijoyinka muujinaya in qofku uusan cudura qabin ee shakhsiyadka leh astaamaha lamidka ah caabuqa COVID-19 in ka badan todoba maalmood waxaa sida guud loo tixgalinayaa inuusan cudurka qabin. Hadday muhiim noqoto. waa in lagu xaqiijiyaa baaritaanka molekulkal. One Step Test for SARS-CoV-2 Antigen (Quruuruxa Dahabiga ah) waxaa loogu tala galay in loo adeegsado caawinta baaritaanka caabuqa SARS-CoV-2. Baaritaankaan waxaa loogu tala galay in qofku asagu is baaro.

## MABDA'A

Baaritaanku wuxuu isticmaalayaa lidka bortiinka SARS-CoV-2 nucleocapsid (N protein) anibody-ga monoclonal I oo lagu daray quruuraxa dahabiga ah ee ku dahaaran cinjira muunadda, iyo lidka SARS-CoV-2 N protein monoclonal antibody II kale oo ku dahaaran xariiqa baaritaanka. Kaddib marka muunadaha loo isticmaalo istiriibka baaritaanka, quruuraxa dahabiga ah ee ku calaamadaysan lidka SARS-CoV-2 N protein monoclonal antibody I wuxuu dhex galayaa antigen-ka SARS-CoV-2 muunadda wuxuuna noqonayaa waxyaabo iskugu jira natigen-antibody. Waxyaabaha iskujira waxaa meesha lagu baarayay gainyaya socod qulqul ah. Kaddibna antigen-antibody-gii la calaamadeeyay waxaa lagu qabanayaa xariiqa baaritaanka waxaana qabanaya anti-SARS-CoV-2 N protein monoclonal antibody II. Heerka midabka ee baaritaan walba waa uu sii kordhayaa si u dhigayaa sida caddaka antigen-ka SARS-CoV-2 ee muunadda kujira.

## DABEECADAHAA SHAQAADA

### 1 Heerka Qabashada (LoD)

LoD-ka baaritaanka sanka nooc xanuunka SARS-CoV-2 oo gaar loo soocay ayada oo kulayli la adeegsanayo. Xanuunka waxaa lagu shiday baaritaanka sanka bilaadanka oo ah qof aan cudurka qabin waxaana la galayay waxyaabo qasqas ah oo fara badan. LoD-ka la qiyaasay ee agab helay baraxa labada heer ah waxaa lagu ogaaday ayada oo la baaray 20 baaritaan oo soo laabtay. LoD-ka la ogaaday ee baaritaanka sanka wuxuu ahaa 200 TCID<sub>50</sub>/mL.

### 2 Daraasadda Heshiiska Caafimaadka

The Shaqada caafimaad ee Antigen-ka One Step Test for SARS-CoV-2 Antigen (Quruuraxa Dahabiga ah) waxaa lagu qiimeeyay ayada oo la baaray 480 muunadood oo baaritaanka sanka ah. Waxaa la barbardhiyay natiijada baaritaanka RT-PCR. Guud ahaan natiijoyinka daraasadda waxaa lagu muujiyay shaxda hoose.

Wadarta		Qalabka (BGI) RT-PCR		
		Cudurka laga helay	Cudurka laga waayay	Wadar hoosaadka
Agabka Getein	Cudurka laga helay	165	4	169
	Cudurka laga waayay	5	306	311
	Wadar hoosaadka	170	310	480

Heshiiska boqoleyda cudurka laga helay (Dareenka baaritaanka) =  $165 / (165 + 5) \times 100\% = 97.06\%$  (95% CI: 93.30% - 98.74%)  
 Heshiiska boqoleyda cudurka laga waayay (Gaar ahaanshaha baaritaanka) =  $306 / (306 + 4) \times 100\% = 98.71\%$  (95% CI: 96.73% - 99.50%)  
 Heshiiska boqoleyda wadarta =  $(165 + 306) / 480 \times 100\% = 98.13\%$  (95% CI: 96.48% - 99.01%)

### 3 Khaas ahaanshaha taxliilinta

#### 3.1 Falgalika Guud iyo Wax ka badalka Bakteeriyada

Noole kasta iyo fayras waxaa laga baaray qaab sadex jeer ah ayada oo uu maganyahay ama laga helay SARS-CoV-2 siday u kala horeeyaan. Marka la tixraaco natiijoyinka, ma jirin isla falgalika ka wada dhexeeya fayraska iyo noolaha.

Fayrasyada ama nooleyaasha	Heerka qasqas ahaan
Human coronavirus 229E	1 x 10 <sup>5</sup> PFU/mL
Human coronavirus OC43	1 x 10 <sup>5</sup> PFU/mL
Human coronavirus NL63	9.87 x 10 <sup>3</sup> PFU/mL
MERS coronavirus	7930 PFU/mL
Adenovirus (Tusaale: C1 Ad.71)	1 x 10 <sup>5</sup> PFU/mL
Human Metapneumovirus (hMPV)	1 x 10 <sup>5</sup> PFU/mL
Parainfluenza virus Type 1	1 x 10 <sup>5</sup> PFU/mL
Parainfluenza virus Type 2	1 x 10 <sup>5</sup> PFU/mL
Parainfluenza virus Type 3	1 x 10 <sup>5</sup> PFU/mL
Parainfluenza virus Type 4a	1 x 10 <sup>5</sup> PFU/mL
Influenza A	1 x 10 <sup>5</sup> PFU/mL
Influenza B	2.92 x 10 <sup>7</sup> PFU/mL
Enterovirus	1 x 10 <sup>5</sup> PFU/mL
Respiratory syncytial viru	1 x 10 <sup>5</sup> PFU/mL
Rhinovirus	4.17 x 10 <sup>5</sup> PFU/mL
Haemophilus influenzae	1 x 10 <sup>6</sup> CFU/mL
Streptococcus pneumoniae	1 x 10 <sup>6</sup> CFU/mL

Streptococcus pyogenes	1 x 10 <sup>6</sup> CFU/mL
Candida albicans	1 x 10 <sup>6</sup> CFU/mL
Biyo dhaqida sanka bin'aadamka oo xiran	14% v/v
Bordetella pertussis	1 x 10 <sup>6</sup> CFU/mL
Mycoplasma pneumoniae	1 x 10 <sup>6</sup> CFU/mL
Chlamydia pneumoniae	1 x 10 <sup>6</sup> CFU/mL
Legionella pneumophila	1 x 10 <sup>6</sup> CFU/mL
Mycobacterium tuberculosis	1 x 10 <sup>6</sup> CFU/mL
Pneumocystis jirovecii	1 x 10 <sup>6</sup> CFU/mL
Pseudomonas Aeruginosa	1 x 10 <sup>6</sup> CFU/ml
Staphylococcus Epidermidis	1 x 10 <sup>6</sup> CFU/mL
Streptococcus Salivarius	1 x 10 <sup>6</sup> CFU/mL

### 3.2 Is-dhexgalka

Maadaama laga yaabo inay is-dhexgalka samaynayo waxaa laga heli karaa qaybta sare ee neef mareenka ayada oo astaamo wadarta (ay kujiraan daawoyinka dukaanka laga iibsado). Ma jiraan natiijoyin helitaanka cudurka ama waayitaanka ah oo been abuur ah oo laga arkay qasqasyada soo socda.

Maadooyinka laga yaabo inay is-dhexgalka samaynayaan	Heerka qasqas ahaan
Dhiig (bili aadan)	5%
Mucin	5 mg/mL
GEL sanka (NeilMed)	5% v/v
CVS Dhibcaha Sanka (phenylephrine)	15% v/v
Afrin (Oxymetazoline)	15% v/v
CVS Buufida Sanka (Cromolyn)	15% v/v
Zicam Dawaynta Qabow	5% v/v
Homopatik (Alkalol)	10% v/v
Cunaha Xanuunka buufinta phenol	15% v/v
Tobramycin	3.3 mg/dL
Mupirocin	0.15 mg/dL
Fluticasone	5% v/v
Tamiflu (Osetamivir phosphate)	500 mg/dL
Biotin	0.35 mg/dL
Methanol	0.15% v/v
Diphenhydramine	0.0774 mg/dL
Dextromethorphan	0.00156 mg/dL
Dexamethasone	1.2 mg/dL

### 4. Daawada la qoray

Oo celinta daraasadda darteed, boqoleyda cudurka la helay ama la waayay ee muunaddu waa 100%. Daraasadda wax soosaarka darteed, heshiiska boqoleyda ah ee labadaba helista cudurka iyo waayidiisaba muunaduhu waxay ahaayeen 100%.

## Calaamadaha la isticmaalay



Ku xafid  
4 C -30 C



La nadiifiyay ayada oo  
la isticmaalao ethylene  
oxide



Soosaaraha



Lambarka lootka



Taariikhda kama  
danbaaysta ah ee  
isticmaalkiisa



Qalabka baaritaanka  
caafimaadka ee vitro



Ka fogee falaaraha  
qoraxda



Taariikhda farsamaynta



Mar labaad ha  
isticmaalin



Ka dhig mid qalalan



Gweler y Ka cabir  
qaado tilmaamaha  
adeegsiga



Digid



Waxaa kujira in ku  
filan 7 baaritaan



Ha isticmaalin haddii  
baaktku waxyeeloobay



Dib ayaa loo soo  
farsamayn karaa



Calaamadda CE



Lambarka UK ee  
nooca qofka



Wakiilka loo  
ogolyahay ee kujira  
bulshada Yurub



Latex lahayn



Mas'uulka ah



Getein Biotech

Ciwaanka: No. 9 Bofu Road, Luhe District, Nanjing, 211505, China.

Teleefoonka: +86-25-68568508

limayl: tech@getein.com.cn

Websayt: www.getein.com



CMC Medical Devices & Drugs S.L

Ciwaanka: C/ Horacio Lengo N° 18,

CP 29006, Málaga, Spain (Spain)

Teleefoonka: +34951214054

CMC Medical Devices Ltd.

Ciwaanka: Office 32 19-21 Crawford Street,

London, United Kingdom (Ingiliizi)

limayl: info@cmcmmedicaldevices.com



EC Certificate No.1434-IVDD-195\_2022

### Soo saaraha qalabka



**Jiangsu Hanheng Medical Technology Co, Ltd.**

16 -B4, #1 North Qingyang Road, Tianning District, 213017,  
Changzhou, Jiangsu, China

ama



**Jiangsu Changfeng Medical Industry Co, Ltd.**

Touqiao Town, Guangling District, Yangzhou,  
225109, Jiangsu, P. R. China



Lins Service & Consulting GmbH  
Obere Seegasse 34/2, 69124 Heidelberg  
Germany (Germany)



Luxus Lebenswelt GmbH  
Kochstr.1, 47877, Willich, Germany  
(Germany)

